

1**NOOCYADA DAGGANAASHADA**

Caadi ahaan, heshiiska kirada wuxuu socdaa hal sanno, waa heshiis sharciga waafaqsan oo waajibaad saara dhinacyada. Heshiiska kirada waxay ku siiyaan sekuriti. Hubso in aad akhrisid heshiiska ka hor inta aadan saxiixin, iyo hayso koobi aad gashatid diiwaankaada. Haddii uu jiro qof kula dggan oo ka baxa, waxaa dhici karto in adiga aad weli mas'uul ka tahay bixinta qeybta kiradooda ilaa aad ka heshid qof cusub oo kula soo dagga.

Dagganaashada ku saleysan heshiiska la soo afjari karo waqti kasta, ha laga sheego afka ama ha la qoro, wuxuu shaqeyaa bil-ilaa-bil. Heshiiska dagganaashada la soo afjari karo markii la rabo wuxuu leeyahay dabacsanaan, balse sugid yar, marka loo fiiriyo heshiiska kirada. Heshiiska dagganaashada la soo afjari karo markii la rab wuxuu ku siiyaa fursad in aad ka baxdid kaddib marka milkiilaha hantida aad siisid ogeysiis ku habboon oo qoran muddo 30-maalin. Waxay kaloo u ogolaataa milkiilaha hantida in uu ku weydiiyo in aad ka baxdid ama in aad kordhisid kiradaada kuna siiyo ogeysiis qoran oo ku habboon muddo 30-maalin.

2**KA HOR INTA AADAN SAXIIXIN HESHIISKA KIRADA**

Mar kasta fiiri abarmanka iyo dhismaha ka hor inta aadan saxiixin heshiiska kirada. Hubso in aysan ka mid ahayn liisaska khayaanada iyo iska fiiri in guriga iyo dhismaha si wanaagsan loo hagaajiya, leeyahiin waxyaabaha ilaaliya ammaanka, qalab, iyo waxyaabaha la adeegsado.

3**BAARISTA HORE DAGGANEYAASHA**

Hubso in aad qortid dhamaan ashtakooyinkaada ama codsiyadaada soo qortid marka aad u gudbineysid milkiilaha hantida. Haddii adiga iyo milkiilaha hantidaada idin dhexmaro murran aadan adiga awoodin in aad xallisid, waa in aad ku fakartid dhexdhexaadin. Dhexdhexaadinta waa hab aan rasmi ahayn aad adiga iskudayaysid in xal la gaaro lana adeegsado dhexdhexaadiye aan dhinacna la jirin.

Haddii aad u baahan tahay dhexdhexaadin, fadlan la xariir *Xafiiska Sugidda Guriyeynta (Office of Housing Stability)* telefoonka 617.635.4200 ama housingstability@boston.gov. Waxaad kaloo haysataa fursad aad *ashtakada macaamilka* u gudbisid *Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud (Attorney General's Office)*.

4**MEESHA LAGA GALO MILKIILAHA HANTIDA**

Milkiilaha hantidaada wuxuu geli karaa gurigaada si uu u fattasho, u sameeyo hagaajin, iyo si uu guriga u tuso dagganeyaalka suurtoagal ah. Haddii aysan jirin degdeg, milkiilaha hantida iyo wakiilada milkiilaha hantida waa in aysan marna gelin abarmankaada haddii aysan horay kuu soo ogeysiinin iyo aysan kaa helin ruqsad. Milkiilaha hantida waa in uu ku siiyo ugu yaraan hal maalin ogeysiis iyo waa in uu iskudayo in uu kuu habeeyo waqti ku habboon uu ku soo galo guriga.

Haddii aad u baahan tahay kaalmo dheeraad ah,
booqo boston.gov/housingstability ama na soo wac ama noo soo dir email:
(617) 635-4200 ama housingstability@boston.gov

5**KULEELKA IYO DANABKA**

Dagganaha waxaa laga dalban karaa oo keliya in uu bixiyo danabka haddii ay jiraan cabbir u gaar ah adeegga la soo dallaco. Milkiilaha hantidaada waa in uu bixiyo kuleelka iyo biyaha kulul haddii aadan saxiixin heshiis qoran oo sheega in aad adiga bixisid.

6**DAMMAANADDA SEKURITIGA**

Haddii la kordhiyo kiradaada, waa in aad baaqiga ka bixisid dammaanadda iyo kirada bishii la soo dhaafay. Milkiilahaada hantida waa in uu kuu soo celiyo dammaanadda, lagu darray kor saar, muddo 30 maalin gudahooda kaddib marka aad guurtid, iyo waa in uu ku siiyo resiid saf-saf u muujiya waxyaabaha uu goystay. Waa in aysan ka goynin kharashka ku baxa waxyaabaha duugga iyo waxyaabaha dhamaada.

7**KHIDMADAHA SHARCIGA IYO KUWA SHARCI DARRADA**

Sharci ahaan, waxaa lagu soo dallici karaa kirada kowaad iyo tan bishii ugu dambaysay, dammaanadda sekuritiga, khidmadda qufulka, iyo qeyb ka tirsan khidmadda fattashaadda. **WAA SHARCI DARRO** in milkiilaha hantidaada uu kugu soo dallaco khidmadda haynta, khidmadda xoolaha guri joogga, ama khidmadda geddisleyga/helaha. Iibiyeyaasha hantida ee shattiga haysta keliya ayaa kugu soo dallici karo khidmadda gedisleyga/helaha. Haddii laguugu soo dallaco khidmadda sharci darro ah, fadlan waxaad u soo sheegtaa *Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud (Attorney General's Office)*.

8**LACAGAHA KIRADA**

Waxaa fiican in **AADAN** kiradaada ku bixinin lacagta caddaanka, balse haddii aad sidaas samaysid, qaado resiid. Ma jirto "muddo leysu dhaaf" bixinta kirada. Waxaa lagaa rabaa in aad bixisid kirada taariikhda ku qoran heshiiska dagganaashada. Waxaa dhici karto in laguugu soo dallaco khidmadda soo daahidda, hase ahaatee taasi waa in ay ku qoran tahay heshiis ogolaada. Xattaa haddii ay sidaas tahay, lama baddali karo khidmaddaan haddii aan lala soo daahin kirada ugu yaraan 30 maalin. Haddii loo baahdo in aad bixisid kirada goor dambe, asbaab la xariira qof ahaantaada, ha qarinin. U tag milkiilaha hantidaada kaddibna isduday in aad kala shaqeysid. Haddii aad gadaal uga dhacdid bixinta kirada, waxaa dhici karto in aad xaq u yeelatid *kaalmada kirada Magaalada Boston*.

9**KA HOR INTA AADAN TAGIN**

Ka bax abarmanka iyadoo nadiif ah kana qaad sawiro ku saabsan xaaladda guriga. Soo celi dhamaan fureyaasha Sii gudbinta warqadahaada Ogeysii shirkadaha danabka. Qabso ballan in lagaa qaado waxyaabaha waaweyn, haddii loo baahdo.

10**CEYMISKA KIREESTAHA**

Iibso ceymiska kireestaha Waa qiimo yar oo la bixiyo haddii ay jirto masalo weyn.

Haddii aad u baahan tahay kaalmo dheeraad ah,
booqo boston.gov/housingstability ama na soo wac ama noo soo dir email:
(617) 635-4200 ama housingstability@boston.gov